FINANCIAL CONDUCT AUTHORITY

# Cabashooyinka PPI waxay dhammanayaan 29 Agoosto 2019

## Maxaad go'aansan doontaa?



## Sameynta go'aankaaga ku saabsan PPI

Waxaan nahay Maamulka Habdhaqanka Dhaqaalaha. Waxaan sharciyeynaa qeybta dhaqaalaha oo waxaan halkaan u joognaa inaan ku illaalino. Warqadaan waxay ku siineysaa warbixin kugu caawineysa go'aansashada haddii ay tahay inaad sameysid cabashada PPI.

Laga yaabo inaad wax ka maqashay PPI (Caymiska Illaalada Lacag bixinta). In ka badan 50 malyan oo heshiisyada PPI ayaa la iibiyay oo waxaan u aragnay in xiligaa la soo dhaafay si qalad ah loo iibiyay. Dad badan ee si qalad ah looga iibiyay way ka cowdeen balaayiin lacagta baanka ah ayaa dib loogu celiyey.

Waxaa jiro waqtiga cusub ee kama dambays ah ee **29 Agoosto 2019** si aad uga sheegatid wax ku saabsan iibinta heshiiska PPI. Kuuma suurtogaleyso inaad ka cabatid taariiqdaan kadib.



## Waa Maxay PPI?

Haddii aad marnaba qaadatay amaah caadi ah, amaahda guriga, kaarka deynka, kaarka dukaanka, ama ku soo iibsatay wax deyna, sida gaari, waxaa laga yaabaa in lagaa iibiyey PPI.

PPI waa heshiiska caymiska ee loogu talo galay in lagu daboolo dib u bixinta ee xaaladaha qaarkood halka aadan laftigaagu bixin karin. Tani waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, waxaa lagaa fariisiyey shaqada ama aadan shaqayn karin sabab la xiriirto shil, jiro ama curyaannimo.

## Geedi-socodka tallaabo tallaabo

1. Iska hubi haddii aad heysato ama aad haysatay PPI
2. Go'aanso haddii aad xaq u leedahay cabasho
3. Haddii aad rabto inaad cabato, cabashadaada si toos ah uga sameeyso bangigga ama adeeg bixiyaha kale
4. Adeeg bixiya haaga wuxuu eegaya cabashadaada – waxa laga yaabaa inay ku weydiiyaan macluumaad badan
5. Adeeg bixiya haaga waa inuu kaga jawaaba 8 toddobaad gudahooda haddii cabashadaada lagu guuleysto

## 1 Sidee ayaan u eegaa haddii aan haystay PPI?

Haddii aad marnaba yeelatay waxyaabaha deynta (deynta, deynta guriga, kaarka deynta, kaarka dukaanka, ama ku soo iibsatay wax deyn sida gaari) waxaa laga yaabaa in lagaa iibiyey PPI. Waxaa laga yaabaa in aad iibsatay, ama waxaa laga yaabaa in lagu daray adigo aanan ogayn. Si aad u hubisid, waxaad midkood:

- Waad fiirin kartaa warqadaada, oo ay ku jiraan xeerarka sharuudaha, iyo bayaanada hadeer si loo arko haddii 'PPI' ama 'caymiska illaalada lacag bixinta' la sheegay. Badeecada waxaa sidoo kale loogu yeeri karaa ilaalada deynta, caymiska deynta, caymiska lacag bixinta deynta, caymiska ASU (shilka, jirada iyo shaqo la'aanta), daboolida akoonka ama daboolida lacag bixinta. Magacyada kale sidoo kale waa la isticmaali karaa.
- Fiiri qoraalada bangigaaga ee dalacaadyada dheeraadka ah ee u dhow warbixinta lacag bixinta.
- Haddii aadan weli hubin, ama aadan haysan wax waraaqo, waxaad la xiriiri kartaa bangigaaga ama adeeg bixiyahaaga kale si aad u weydiisid iyaga haddii aad marnaba heshay PPI.

Waxaa jiro sharaxaada xiriirka ee bixiyayaal badan ee websaydka FCA **www.fca.org.uk/ppi** ama ka bilow khadkeena ee **0800 101 8800**.

## 2 Ma u Xaq mawleedahay inaan ka cabto wax ku saabsan PPI?

Haddii aad mooday inaad leedahay PPI, waxaa jiro labo Sababood ee laga yaabo inaad u go'aansato in aad cabato:

1. **Ibinta qaldan PPI:**
   Cabashada ah in PPI adiga qalad lagaaga iibiyay.

2. **Qiimaha uu ka helayo bixiyaha:**
   Cabashada in bangiggaaga ama bixiyaha kale helay heer sare oo qiimaha ee laga helo iibinta PPI laakin ma kuu sheegin midaan markii aad iibsatay (ka dib kiiska maxkamadda ee inta badan la dhaho 'Plevin').

## Ibinta qaldan PPI

**Waxaa laga yaaba in si qaldan lagaaga iibiyey PPI haddii aad la kulantay kuwa soo socda:**

- waxaa lagugu cadaadiyay iibsashada PPI
- waxaa laguu sheegay inaad haysatid PPI
- waxaa lagula taliyay inaad iibsatid PPI ee aanan ku habooneyn xaaladahaaga ama baahidaada
- waxaa laguu balanqaaday qiimo raqiis ah haddii aad iibsatid PPI
- laguu sheegay deyntaada ama codsiga deynta waxay aad ugu dhaweyd in la ogolaado haddii aad iibsatid PPI



- PPI ayaa lagu daray isaga oo aan kuu sheegin
- aad iskaaga u shaqeysaneysay, shaqo la'aan ama shaqada ka fariisatay laakin laguugula taliyay inaad iibsato PPI
- aad lahayd xaaladaha horay u jiray ee caafimaad waqtiga iibsashada PPI
- laguugula taliyay in xaalada caafimaadka horay u jiray lagu daray heshiiska PPI-gaada (ama tallada ma lagu darin)
- lama cadeynin inaad dulsaar ka bixinaysid PPI haddii lagu daro deyntaada
- lama cadeynin in PPI uu dhammaanayo ka hor deynta inta aan dib loo bixin

Waxaa jiri karo qaabab kale ee laga yaabo in si qalad ah loo iibiyay PPI. Haddii aadan weli hubin la xiriir khadkayaga caawinta **0800 101 8800**.

## Qiimaha uu ka helayo bixiyaha

Waxaan soo saarnay sharciyo cusub oo waajib ka dhigaya in banggiyada iyo bixiyeyaasha kale ay tixgeliyaan cabashooyinka ku saabsan qiimaha ay ka helaaan PPI. Xeerashaasi waxay ka dhasheen *go'aanka Maxkamada Ugu sarraysa ee Plevin v Paragon Personal Finance Limited*.

Tani waxay la micna tahay waxaa hadda kuu suurtogali karto inaad ka cabatid haddii aad u mooday bangigga ama bixiyahaaga helay heer sare ee qiimaha laga helo PPI oo aysan kuu sheegin markii aad iibsatay.

Waxay la micna tahay waxaad dib u heli kartaa qaar ka mid ah lacagta xittaa haddii aad aan si qalad ah lagaaga iibin PPI. Iyo haddii aad horay u sameysay cabashada iibinta qaldan oo la diiday waxaa kuu suurtogali karto inaad sameysid nooca cabasho cusub.

## Ma ka cabatay PPI si qaldan horay loogu iibiyay?

# Maya

Waa inaad tixgelisaa haddii laga yaabo in si qaldan lagaaga iibiyey PPI. Bixiyahaaga wuxuu tixgelin doonaa qiimaha ay ka heleen in ay qeyb ka tahay cabashada iibinta qaldan xitaa haddii aadan sheegin.

# Haa

### Cabashadaada waa la diiday

Waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad samayso cabasho cusub oo ku saabsan qiimaha uu helay bangigga ama bixiyaha kale –la xiriir bixiyahaaga.

### Cabashada waa lagu guuleystay waana laguu soo celiyey qaar ama lacagtaada oo dhan

Ma heli doontid lacag ka badan haddii iminka aad ka cabato qiimaha laga helay iibinta isla heshiiska PPI. Tani waxaa waaye sababtoo ah ma jirto qasaare kale oo aad u baahan tahay inaad sheegato.

### Waxaad ka cabatay wax ku saabsan iibinta qaldan ee PPI ilaa dhammaadkii 2015

Bixiyaahaga waxay ahayd in uu horay kugu sheego qoraal inay tixgelin doonaan qiimaha ay ka heleen taasoo qeyb ka ah cabashadaada –ka hubi warqadda cabashadaada ama la xiriir bixiyahaaga haddii aadan u hubin.

## 3 Sidee ayaan u cowdaa?

Haddii aad heshay PPI oo aad rabtid inaad ka cabatid waa bilaash inaad midaan nafsadaada sameysid. Uma baahnid inaad bixisid waraaqo walba ee la jirto foomk a cabashadaada. Waa inaad si toos ah ugu cabataa bangiggaaga ama bixiyahaaga kale:

**telefoon** – waxaad wici kartaa bixiyahaaga oo aad u sharxi kartaa inaad rabto inaad samayso cabashada PPI

**boosto** – waxaad ka soo qaadan kartaa foomamka cabashada websaydka FCA **www.fca.org.uk/ppi** oo boosto ugu dir bixiyahaaga

**onleenka** – bixiyayaal badan waxay hayaan foomka cabashooyinka waxaanad ku

**Laanta** – waxaad aadi kartaa laanta deegaankaaga waxaana u sharxi kartaa inaad rabto in aad sameyso cabashada PPI

## Shirkadaha cabashooyinka

Shirkada cabashooyinka (ama shirkada maamulida cabashada, CMC) waxay kala soo xiriiri karaan in ay kaa caawiyaan sameynta cabashada PPI. Waxay u badan tahay inay kugu dalacdo adeegaan iyada oo la qaadayo saamiga lacagta aad heshid. Haddii aad go'aansatid inaad isticmaashid shirkadda cabashada, hubi in laga ansixiyey Wasaaradda Caddaaladda Diiwaanka Ansixinta Ganacsiga oo hubi fahamka waxa ay goyneyso.

4. Bixiyahaaga waa inuu eegaa cabashadaada – waxay ku weydiin karaan warbixin dheeraad ah marka waa muhiim inaad macluumaadkaaga xiriirka ku sheegtid foomka cabashadaada.

5. Bixiyahaaga wuxuu kuugu soo dirayaa warqada gudaha 8 isbuuc si uu kuugu sheego haddii cabashada aad ku guuleysato oo aad yeelanayso lacag, ama sharaxaada sababta laga yaabo in ay ugu baahdaan waqti badan si ay u eegaan cabashadaada.

Haddii aadan ku faraxsaneyn jawaab ugu dambeeyo ee aad ka heshid bixiyahaaga, ama aadan ku helin jawaab gudaha 8 isbuuc, waxaad u caban kartaa Adeega Dhexdhaxaadinta Dhaqaalaha ee 0800 023 4567.

**Waxaad ka heli kartaa warqadaan qaabab kale iyo luuqado kala duwan. Haddii aad jeclaan laheyd warbixin ka badan ama qaab kale:**

Booqo websaydkeena:
**www.fca.org.uk/ppi**

Wac khadkeena caawinta:
**0800 101 8800**

Ama Telefoonka Qoraalka:
**18001 01434 372 580**

FINANCIAL CONDUCT AUTHORITY

**WAQTIGA KAMA DAMBEYSTA AH EE PPI 29 AGOOSTO 2019**

Werin 01
© Financial Conduct Authority 2017
Dhammaan xuquuqaha way dhowranyihiin